‹‹ ***Bismillaahi Alraxmaani Alraxiimi*** ››

Saalax Xaashi Carab
Hargeysa, 01.01.2000

Bismillaahi waa dééq
khasnad weeye Deeqsigu
fadliga Daaha awgii
ugu daray Quraankoo
Diinteenna mooyee
an la siin dadkii hore!

Bismillaahi waa dééq
waa dabb Ilaaheen
asmaa'diisa dunidiyo
aakhir danbaysa ba
uu ku muujey daymada
magacyadiisa daahira
door kasta ba awoodaha
falgalka Daa'im Weynaha!

Bismillaahi waa dééq
toban iyo todoba dabaq
sirta Rabbi u degiddeed
asraaraha daboolka leh
cilmi dihin du liyo hs
ilsha laga durduurtiyo
darka weeye laga galo
bu'da nuurka daalaca!

Waa diirad ruuxloo
daadihinta toobboon
xaqqa lagu daliishado,
waa dooribeennada
mugdigiyo dalawyada
dulimaadka lagu gudo,
karti weeye dooroo
indhaha diir ka qaaddoo
wax ka durugsan dhaayaha
soo dhoweysa daymada
oo ka feydda daahyada!

Bismillaahi waa dééq
Soddon iyo toddoba dabaq
xarakada dallaysiyo
xaraf waliba waa damal,
ba'du daabad weeyaan
tankay doonta qaaddoo
wax dulsaaran dunidiyo
haddii dayaxxa lagu raro
la dabbaalanaysoo
aan culays dareemayn,
barta ay dultaallaa
waa badweynta diintiyo
digrigiyo cibaadada
dekeddeedu waa ruux
qalbiga muumin daacada!

Bismillaahi waa dééq
tawxiidka dabadeed
waa furaha daawada,
danta iy qabuulada
waa dabb la'aanteed
duunyada la gawraco
haddaan Bissinka lagu darin
ay xoola-daabaxxu
maqdaciyo dirkiisiyo
birayntoodu duuf tahay,
waa dabb la'aanteed
haddaan bilawga lagu darin
hawl kastoo dad uu galo
sii qaneeca duugiyo
duulduulid mooyee
aan dedaalku midhadhalin!
Waa dabb la'aanteed
haddii soorta lagu dego
iska dudubinta maahee
dheefta aan dx laga helin!

Bissinku waa dabiib dhaba
waa daaw ruuxiya
oo bogsiiya duunkiyo
ludda iyo dubaaqyada,
waa nuur daweyn kara

daanada quluubtiyo
bahda dakharka gaadhiyo
cudurada dahsoonoo
halistoodu darantoo
oon dhaayo deyey arag!

Bismillaahi waa danab
dabka weeye lagu gubo
sixirkiyo durriinkiyo
falka dabaradiisiyo
danqaqamidda Jaankiyo
Jinka daara aadmiga
wax durrayn leh oo idil
iyo dhammi dabaylaha.

Bissinku waa daweeyaha
dareemada bukoodiyo
xanuun kasta dabbaaloo
degdeg loogu raystoo
durbadaba fiyoobi ah
daw caafimaad sida,
shardi baase dabayaal
waa inaan dubnaha qudha
laga odhan dabuubta e
daacad waa in laga yahay
niydduna diyaar tahay
qalbiga doonistiisuna
Rabbi-bari u dumantahay!

Bismillaahi waa duc
kolkuu nujumku daalaco
oo badweynta degganayd
uu dabaylo geliyoo
baddu say diddoo kale
say duulimaad tahay
markay dininglaysoo
biyeheedu duubmaan
mawjado isdaba yaal
oo dabaqyo laale'eg
kolkay isu-daryaamaan
oy hugunka doobshaan
docda sare ka xoodhshaan,
kolkay doonni goosh ihi
duuffaan la kulantoo
daalaadhacaysoo
maray dushsha taffaysiyo

maray daaddegaysiyo
maruu xiis dabraayaa
kala-xeel duduwayoo
ay dadab u ciirkii
dheelligiyo dekaankii
barbar dhinac-u-daacay
badda soo darsanaysayna
khan waliba daf uu yahay
tarshadduna ku daraysoo
darbadduna u dheer tahay,
oy cirkana daruuruhu
lakab daahyo waaweyn
samadii duhaadheen
madow madow dulsaar ku ah
aragtidu dam ay tahay!
doon qarraqan dadkeedii
indhahaa u dayrshee
kolkuu dakhalku soo jabo
korna roob ku da'ayoo
hoosna daad ka soo galo,
kalkay quus daraadeed
khashabadday dulsaarnayd
ay daawo-beeliyo
kala daadad ay tahay
degitaan u dhowdahay
naftu ay digleedahay
awoodli'i ildarantahay
oo itaalgab dagam tahay
aadmigu daciif yahay
oy kama danbays tahay!
Bimillaahi waa deyr
duco weeye lagu helo
Rabbi daymadiisiyo
dawgal lagu badbaadiyo
gurmad Eebbe soo diro!
Bissinku waa dallaalimo
waa dawga ferejyada
waa magacca dejin kara
duuffaan kastoo weyn!
shardi baase dabayaal
waa inaan dubnaha qudha
laga odhan dabuubta e
daacad waa in laga yahay
dar-Ilaahay tuugmada
debeciyo addoonsamid
qalbigu uu diyaar yahay

Rabbi-bari u dumanyahay!

Bismillaahi waa duć
dab markuu qabsado reer
irriduna u darantahay
holacuna duliyo hś
uu dureemadii helo
ka hulaaqmo daafaha
docuhuna belbelayaan
oy hooy deebtii
marba daan ku booddoo
intay dubantay mooyee
daadguraynta ubadkii
marba qaar dafaysoo
la baroor dakaantoo
ay la duukhdo baayaal,
raradiyo dulsaarkii
markuu degel ku soo dhaco
qalbi duman hadduu yahay,
waa magaca demin kara
ololkana dam siin kara,
Bismillaahi waa deyr
shardi baase daboyaal
daacad waa inay tahay!

Duul Ilaahay caasiyey
qallad lagu dangiigshiyo
duruuf adag masiibiyo
iska dabawareegiyo
tiiha duluglihiisiyo
dubayaasha lagu tumo
belo kala dambaysoo
qaarba qaar ka dawgalo
markay dininigleeyaan
waxaan daafac loo helin,
Bismillaahi waa daar
derbi weeye laga galo
dad waxaanu kari karin
oon daafad loo hayn
shardi baase dabayaal
daacad waa in laga yahay.

Bismillaahi waa danab
waa gantaal dagaalada
dirirtiyo jahaadyada
muslinka dawladdiisiyo

Diinta lagu gargaaroo
gaalada dabiyo qaxan
ku daadduunsha olol duba
danbasiyo ka dhiga boodh
durbadiiba kala bida,
Bissinku waa dabayl kulul
oo cadawga loo diro
meel kastuu daaddego
ugu dega halkuu dego
oon duhaadh ceshshaa jirin,
waa fallaadh dussaayoo
maskaxfered dawaanshiyo
wax ka dila dareemada
iyo mariya digasaadh
door dhoweyto kii helay
iyo kuwo ka sii daran!

Bismillaahi waa deyr
waa dawga lagu maro
badweyntiyo dabaylaha
mugdigiyo dalawyada
waa furaha daaraha
danta iyo qabuulada
waa bilawga daawada
Daa'im magacca Weynaha!

Bismillaahi waa dééq
khasnad weeye Deeqsigu
fadkiga Daaha awgiis
ugu daray Quraankoo
Diinteena mooyee
aan la siin dadkii hore!

(RABBI BAA MAHAD LEH)

Dhammaad